

## **Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) cusboonaysiinta u-qalmitaanka**

Haddii adiga ama ardaygaaga aad ka heshaan caymiska caafimaadka Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP), waxaa muhiim ah inaad cusboonaysiisaan macluumaadkaaga xiriirka. Laga bilaawo Abriil 1, [Maamulka Caafimaadka Oregon \(OHA\) wuxuu bilaaway dib u eegista iyo go'aaminta u-qalmitaanka xubinta OHP](#). Caymiska OHP si toos ah ayaa loo cusboonaysiiyay saddexdii sano ee la soo dhaafay, laakiin caymiska Medicaid ee federaalku xoojiyey wuxuu dhammaaday dhammaadkii Maarso. Iyadoo dadka intiisa badani ay weli u qalmi doonaan dheefaha jira, OHA waxaa looga baahan yahay inay dib u eegto u-qalmitaanka dhammaan xubnaha OHP bartamaha 2024. Oregon waxay qaadatay tillaaboojin lagu hubinayo in inta dadka ugu badan ee suurtogalka ah ay ku jiraan caymis caafimaad inta lagu jiro kala guurka.

Si aad u hubiso in qoyskaagu haystan helitaanka daryeelka, oo ay ku jiraan caafimaadka dhimirka iyo daawaynta ku-tiirsanaanta kiimikaad, hubi in macluumaadkaaga xiriirka uu yahay mid cusub oo dib u eeg ogeysiis kasta oo aad hesho kaas oo kuu sheegi doona waxaad u baahan tahay inaad samayso si aad u si heysatid dheefaha. Sida ugu dhakhsaha badan ee xubnaha OHP ay bixin karaan cusbooneysiin waa iyagoo taga [benefits.oregon.gov](#) oo ay galaan akoonooda ONE. Ikhtiyaarada kale ee cusboonaysiinta macluumaadka xiriirka ayaa sidoo kale laga heli karaa websaydka [halkan](#).

Haddii qof uusan u sii qalmin, dheeftooda OHP waxay sii socon doontaa 60 maalmood oo kale. OHA waxay [ka caawin doontaa xubnaha u gudbida](#) caymiska kale iyadoo bixinaysa macluumaadka. Tan waxa ku jiri kara macluumaadka ku saabsan kaalmada dhaqaale ee loo heli karo qorshayaasha caafimaadka Marketplace.

Ardayda waxay weli ka heli karaan daryeel caafimaad oo aan kharash lahayn [Xarumaha Caafimaadka Ardayda](#) ee Degmada Multnomah ay maalgaliso iyo [Xarunta Benson Wellness](#) ee OHSU ay maalgaliso, iyadoon loo eegayn heerka caymiska.

## **Ogeysiisaya dheefaha cuntada EBT ee Pandemic-ka ee carruurta waxay ku jiraan boostada**

May 31, 2023, cunug kasta oo u qalma dheefaha cuntada ee Pandemic-ka EBT (P-EBT) wuxuu boostada ku heli doonaa kaarka P-EBT. Kaarka waxa ku jiri doona \$391 oo gargaar cunto ah. Kaarkani waxa uu ka duwan yahay kaarka wareejinta dheefaha elegtarooniga ah ee caadiga ah (EBT). P-EBT waa lacag loogu talagalay carruurta helitaankooda cunto ku filan oo tayo leh laga yaabo in uu saameeyey COVID-19.

Dheefaha cunnada waxaa heli kara dhammaan carruurta u qalmay inay helaan Barnaamijka Qadada Dugsiga Qaranka ee bilaashka ah ama qiimaha jaban inta lagu jiray sannad dugsiyedka 2021-22. Dheefaha sidoo kale waxay heli karaan dhammaan carruurta ka yar lix sano ee helay Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP) dheefaha xagaaga 2022. Tan waxaa ku jira dhammaan ardayda dhigata Dugsiyada Bixinta U-qalmitaanka Bulshada (CEP).

Inta u dhaxaysa Maarsa iyo May 2023, cunug kasta oo u qalma wuxuu heli doonaa laba xabbo oo boosto ah oo iyaga loogu talagalay:

- Warqad ogeysiinaysa inay xaq u leeyihii inay helaan dheefaha P-EBT; iyo
- Baqshad gooni ah oo ay ku jiraan kaarkooda P-EBT oo uu ku jiro \$391 oo gargaar cunto ah.

Qoysaska leh carruur badan oo u qalma waxay heli doonaan warqado gaar ah iyo kaarar cunug kasta oo u qalma.

La xiriir xarunta wacitaanka ee P-EBT 844-673-7328 wixii su'aalo ah; waxay furan tahay Isniin ilaa Jimce laga bilaawo 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo. Waqtiga Baasifigga. [Websaydka P-EBT](#) sidoo kale waxay leedahay macluumaad waxtar leh oo Ingiriisi iyo Isbaanish ah. Qoysasku sidoo kale waxay la xiriiri karaan [211Info](#) wixii macluumaad ah ee ku saabsan cuntada iyo kheyraadka kale.

